

Xafiiska Arrimaha Soogalootiga iyo Qaxootiga

Xafiiska arrimaha soo galootiga iyo qaxootiga (Office of Immigrant and Refugee Affairs “OIRA”) waxuu ka shaqeeyaa horumarinta nololaha dadka muhaajiriinta iyo qaxootiga ee degan magaalada Seattle. Iyadoo dar-dar galineyso olohaha cusub ee jinsiyada, OIRA waxey dooneysaa in ay kordhiso tirada soo galootiga iyo qaxootiga si ay u noqdaan muwaadiniin, kana qayb-qaataan geedi socodyada howlaha madaniga ah.

Ololahan cusub ee seminaarka jinsiyada waxaa kuu keenay Magaalada Seattle, tabrucayaasha dhigooda ah, iyo ururada ku salaysan bulshada:

- Asian Counseling and Referral Service
- Catholic Immigration Legal Services
- Chinese Information and Service Center
- Entre Hermanos
- Horn of Africa Services
- International Rescue Committee
- Korean Community Service Center
- OneAmerica
- Refugee Women’s Alliance
- Somali Family Safety Task Force
- South Park Information and Resource Center
- The West African Community Council



Somali

Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo codsiga jinsiyadda Mareykanka?



Kaalay oo nagala soo qeybgal si lagaaga caawiyo codsiga jinsiyada Abaabulay Catholic Immigration Legal Services iyo South Park Information and Resource Center.

Halkaas oo ay jogaan kooxo qareeno oo wakhtigooda ku tabarucay, iyo turjubaan kaa caawin doona codsigaagii muwaadinimada. **Waa lacag la'aan dhammaan adeegyada loo qabanyo dadka heysta sharciga deganashaha joogtada ah (dadka haysta kaarka cagaaran “green card”).**

June 29, 2019 SATURDAY

Start time: 10 AM

SOUTH PARK
COMMUNITY CENTER
8319 8TH AVE S
SEATTLE, WA 98108



Seattle
Office of Immigrant
and Refugee Affairs

Wixii macluumaad dheeraad ah ama in aad saxiixdo, waxaad tagtaa: newcitizencampaign.org ama wac: (206) 328-5647.

YEELASHADA

SEMINAARKA DALBASHADA JINSIYADA SHURUUDAHA XAQ U YEELASHADA:

- Waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano laga bilaabo maalintaad buuxiso.
- Haystay deganaasha rasmiga ah (Green Card) ugu yaraan shan sano ama sadex sanadood hadii uu qabo xaas Maraykan ah.
- Ku sugnaa gudaha Maraykanka 2.5 sanadood ee shantii sano ee ugu danbeeyey ama 1.5 sadexdii sano ee ugu danbeeyey haduu qabo xaas Maraykan ah. Waa inaanu ku sugnaan sanad ama ka badan dibada Maraykanka shantii sano ee ugu danbeeyey ama sadexdii sano ee ugu danbeeyey haduu qabo xaaas Maraykan ah.
- Ku hadli karo Aasaaska Ingiriiska (waxaa laga yaabaa inaad u qalantid ka dhaafida).

SEMINAARKA DALBASHADA JINSIYADA WAXA LAGAA RABO MAALINTA WUMAADINIMADA

- Deganaansha rasmiga ah (Green Card).
- Waraaqaha canshuur celinta ee ugu danbeeyey iyo W-2 form.
- Baasaboorkaaga hadeer iyo dhammaan kuwa dhacsan.
- Keenso wixii dokumentiyo ah oo ku saabsan waaxda imigareeshinka.
- Qidmada xareynta - kukala duwan heerka daqliga.

Qidmada buuxdo waa \$725.

- Haddii aad qorsheyneysid inaad iska bixiso codsiga nafsadaada waxaad u baahneysaa jeeg, jeega qasnajiga, ama dalabka lacagta ee lagu diray "U.S. Department of Homeland Security."

Waxaad u qalmi kartaa qidmada ka dhaafida ama qidmada la dhimay.

Si loo hubiyo u qalmidaada, waa inaad la imaataa kuwa xiggo:

- Cadeynta DSHS faa'idooyinka bulshada sida warqadaada abaalmarinta.
AMA
- Cadeynta daqligaaga: soo noqodka canshuurtaada hadeer iyo rasiidka bixinta.

WAXAA LA HELAYAA TURJUBAANO, LAAKIIN WAQTIGA AAD SUGEYSID
WUU YARAANDONAA HADDII AAD KEENSATO TURJUBAAN KUU GAAR AH.

DUKUMENTIYO DHEERAAD AH

WAXAAD SIDOO KALE U BAAHANEYSAA INAAD USU KEENTID WARBIXINTA XIGTA:

- Cinwaanada guryihii aad deganayd shantii sanadood ee ugu danbeeyey.
- Magaca iyo cinwaanada meelihii aad ka shaqaysay shantii sano ee ugu danbaysay.
- Hadaad dhooftey intaad haysatey deganaanshaha rasmiga ah, dalalkii aad tagtey iyo mudooyinkaad ku sugnayd. Baasaboorkii aad ku dhooftey iyo tikadhadii aad goosatey, hadaad heli karo soo qaado.
- Magacyada caruurtaada, taariikhda dhalashada iyo lambarada kaadhahkooda deganaashaha rasmiga ah (Green Card).
- Magacyada, taariiqda dhalashada, taariiqda guurka iyo taariiqda furiinka ee dhammaan xaasaskaaga hadeer iyo la soo dhaafay.

WAXAAD SIDOO KALE U BAAHAN KARTAA WARAAQAHAAN DHEERAADKA AH:

- Shahaadada guurka.
- Amar divorce.
- Cadeynta inaad taageertay dadka kuugu tiirsan.
- Warqada badelka magaca sharciga (haddii magaca ku qoran kaarka cagaarka uu ka duwanyahay magacaaga sharciga hadeer).
- Haddii aad ku codsanaysid sida ku saleysan guurka ee ku socdo muwaadinka Mareykanka, la imow cadeynta xaaskaaga muwaadinka Mareykanka ah (tusaale ahaan baasaboorka, shahaadada wadaniyeynta ama shahaadada dhalashada Mareykanka) iyo waraaqaha cadeeyo inaad wada nooshihiin.
- Haddii weligaa lagu xiray ama ay ku xabsiyeeyeen saraakiisha maamulka oo sabab walba ah, la imow Shahaadada Cadeynta ee ka imaaneyso Maxkamada Dambiga, Wargelinta Booliska, iyo waraaqo kale ee aad ka haysid dhacdada (yaasha).